Gargaarka Maaliyadeed

UJEEDADA

Si loo abuuro nidaam lagu maamulo gargaarka dhaqaale (lacag bixin) ee loo fidiyo bukaanka ee ay u fidiyaan waaxyaha Carris Health Entities, sida ay dhigayaan sharciyada Xeer Ilaaliyaha Minnesota iyo Waaxda Canshuuraha. Qoraalka waaxyaha loga hadlayo waa

Xarunta Carris Health waxa ay nidaamkan ka dhaqan gelineysaa:

Carris Health - Rice Memorial Hospital
Carris Health Care Center & Therapy Suites
Carris Health Dental Clinic
Carris Health Cancer Center
Carris Health Surgery Center - Willmar
Carris Health Home Medical
Carris Health Rehabilitation Center
Carris Health Rice Hospice
Carris Health Behavioral Services (hospital-based services only)
Willmar Ambulance Services
Carris Health Sleep Center

SHARCIGA (Nidaamka)

Hay'adda Carris Health waxa ay dusha u ridatay mas'uuliyadda daryeelka bukaanka iyada oo aan loo eegin in ay bixin karaan adeegga iyo in kale. Sidoo kale, waxa ay hay'addu bixisaa gargaar maaliyadeed dadka ka soo baxa shuruudaha hoos ku xusan.

SHURUUDAHA

A. Hay'addu waxa aya isku dayeysaa in ay ogaato dadka xaqa u yeesha gargaarka maaliyadeed. Hay'addu waxa ay bukaanka ama wakiilada bukaanka siineysaa codsiga iyo shuruudaha ku xiran gargaarka maaliyadeed iyada oo siineysa wixii kale ee talo ah ee loo baahdo. Waxa codsiga iyo nidaamka u degsan aad ka heleysaan bogga inetnetka ee Caris Health oo aad lacag la'aan uga soo dajisan kartaan. Hay'adda ayaa bukaanka wargelineysa sida loo codsado gargaarka, macluumaadka la idinka doonayo codsiga iyo halka aad u direysaan codsiga. Waxaa suurogal ah in hay'addu ay codsato macluumaadka canshuurta ee bukaanka, qeybta dambe ee jeegga mushaharka, dakhliga Lambarka Bulshada, warbixinta bangiga, wargelinta go'aanka fulinta, Foomka Go'aanka Degmada, foomka shaqo la'aanta, foomka gargaarka dadweynaha, foomka taageerada caruurta, foomka naafada

Ama foomka hawlgabka. Waxaa kale oo suurogal ah in hay'addu codsato in ay xaqiijiso hantida. Iyada oo laga doonayo macluumaadka aad ku sheegtay codsiga, foomka canshuurta iyo xaqiijinta hantida, qof kasta goonidiisa ayaa go'aan looga gaarayaa si loo xaqiijiyo haddii uu bukaanku ka soo baxay shuruudaha ku xiran gargaarka maaliyadeed iyada oo la raacayo jaantuska ku xusan bandhigga A. Xaq u yeelashada garaagrka maaliyadeed kuma xirna da'da, jinsiga, qowmiyadda, midabka, nooc galmoodka ama diinta uu aaminsan yahay. Dhamaan adeegyada muhimka u ah caafimaadka waa loo codsan karaa gargaarka maaliyadeed. Qaliinada aan muhimka aheyn iyo kuwa la isku qurxiyo looma adeegsan karo.

B. Codsiga Gargaarka Maaliyadeed

1. Si aad u codsato gargaarka maaliyadeed, waa in bukaanku buuxiyaa foomka (oo ay wahleiyaan caddeymaha) ee bogga internetka oo aad u soo gudbisaa codsiga Carris Health, 301 Becker Avenue SW, Willmar, MN 56201 ku hagaaji: Xafiiska Ganacsiga, adiga oo gacanta ku keena ama boostada soo dhiga.
2. Codsiga waxa aad ka heli kartaan barta internetka ee http://www.ricehospital.com/billing-insurance/documents-and-resources kuna soo dir: PatientEstimateRequests@rice.willmar.mn.us ama xafiiska gacansiga ee Carris Health.
3. Si laguugu tixgeliyo gargaarka maaliyadeed, bukaanku waa in ay la shaqeeyaan Carris Health si ay uga fikiraan hab kale oo lacagta lagu bixin karo sida codsiga Medicare and Medicaid. Bukaanka waxaa laga doonayaa in ay bixiyaan macluumaadka muhimka ah iyo cadeyntooda marka ay codsanayaan gargaarka maaliyadeed iyo bixinta kharashka ee barnaamijyada kale ee dadweynaha.
4. Waxaa intaa dheer si aad u buuxiso codsiga, waa in dadku u diyaar garoobaan in ay soo gudbiyaan qoraalada soo socda:
    a. Canshuur celintii ugu dambeysay, haddii aad heli kartid.
    b. Cadeynta dakhliga ee codsadaha (iyo xaaska haddii ay khuseyso), sida qeybta dambe ee jeegga kii ugu dambeeyey, qeybta dambe ee ceymiska shaqo la'aanta, ama macluumaad ku filan oo cadeynaya xaaladda dhaqaale ee bukaanka codsanaya taageerada.
    c. Warbixinta xisaabta bangiga
    d. Cadeynta sida aad u bixiseen lacagaha deynta ah ee adeegii hore ee isbitaalka.
    e. Cadeyn muujineysa in aad xaq u leedihiin Medicaid.
    f. Xaaladaha qaarkood, macluumaad ku saabsan hantida ma guurtada ah ee aad leedihiin, waxaa kale oo suurogal ah in heerka deyn (dhibcaha) la adeegsado si loo xaqiijiyo in aad xaq u yeelataan.

C. Qodobada keeni kara in aad xaq u yeelato

1. Haddii aanu bukaanku soo gudbin macluumaadka laga doonayo oo taageeraya inuu xaq u yeesho gargaarka maaliyadeed, Waxaa suurogal in Carris Health ay macluumaadka ka raadiso meelo kale ama barnaamijyada is diiwaan gelinta si loo xaqiijiyo in aad xaq u leedahay marka:
    a. Bukaanku aanu laheyn hoy (dibjir)
    b. Bukaanku xaq u leeyahay barnaamijyada gargaarka ee gobol kale.
    c. Bukaanku xaq u leeyahay gargaarka cuntada ama barnaamijka cuntada ee dugsiga.
    d. Bukaanku xaq u leeyahay barnaamijyada - daawada gobol kale.
    e. Bukaanku degan yahay cinwaan loo aqoonsaday dadka dakhligoodu hooseeyo.

COPY

f. Bukaanku waxa uu daaweyn lacag la'aan ka helaa isbitaalka bulshada waxaana halkan loogu soo diray daaweyn dheeraad ah.

2. Shuruudaha Dakhliga ee ku xiran Gargaarka Maaliyadeed waxaa laga heli karaa:

   a. Cisbitaalka http://www.ricehospital.com/billing-insurance/documents-and-resources

   b. Isbitaalka iyo Bukaan Socod eegtada: http://www.ricehospital.com/billing-insurance/documents-and-resources

   c. Ama adiga soo waca Xafiiska Ganacsiga ee 1-866-601-0527

D. Nidaamka u degsan Carris Health waxa uu dhigayaa in la joojiyo dadaalka lacag ururinta marka qofka loo qoonsado inuu xaq u leeyahay 100% gargaar maaliyadeed. Haddii bukaanka loo ogolaado gargaar maaliyadeed oo ka yar 100%, waxaa la weydiisanayaa inuu bixiyo haraaga haray. Bukaanka ayaa mas'uul ka ah inuu bixiyo lacagta hartay. Haddii aanu bukaanku bixin karin lacagta hartay oo dhan sida ugu dhaqsaha badan, waa inuu nala soo xiriiraa sida ugu dhaqsaha badan si loogu sameeyo qorshe uu tartiib tartiib ugu bixinayo lacagta.

E. Gargaarka Maaliyadeed waxaa loogu diidi karaa sabaha soo socda:

1. Dakhliga qofka oo ka sareeya heerkii loogu talo galay.

2. Lacagta oo ay bixin waayaan koox sadexaad oo ay ka mid yihiin Medicaid iyo Minnesota Care. Haddii uu bukaanku leeyahay ceymis Medicare lagama doonayo inuu codsado gargaarka caafimaadka gobolka (Medical Assistance).

3. Been abuur codsiga.

4. Adeegga oo aad ah mid aan daruuri aheyn ama is qurxin ah.

5. Adeegga waxaa loo fidiyey qof aan heysan dhalashada Mareykanka oo si cad lagu wargeliyey adeeg caafimaad oo lacag la'aan ah.

6. Bukaanka oo aan soo gudbin macluumaadka uu ka codsaday ceymiska caafimaadka.

7. Codsiga oo aan dhameystirneyn, dib in aad u codsato waa laguu ogol yahay. Isbitaalada Carris Health lacag kuma xisaabaan adeegga gargaarka degdegga ah iyo dareyeelka caafimaadka dadka loo ogolaado gargaarka maaliyadeed, iyada oo loo eegayo habka bixinta kharashka ee 501r ee lacagta laga qaado dadka caadiga ah ee lagu daweeyo gargaarka degdegga oo loo fidiyo daryeel caafimaad.

F. Wargelinta iyo Baahinta Gargaarka Maaliyadeed.

1. Codsiga Gargaarka Maaliyadeed waa mid lacag la'aan ah oo la siiyo dhamaan dadka codsada. Shaqaaluhu waxa ay bukaanka wargelinayaan habka uu u shaqeeyo Gargaarka Maaliyadeed. Nidaamka Gargaarka Maaliyadeed, warbixinta Gargaarka Maaliyadeed, Codsiga Gargaarka Maaliyadeed, jadwalka Gargaarka Maaliyadeed waxa aad ka soo degsan kartaan bogga internetka ee RiceHospital.com(http://www.ricehospital.com/billing-insurance/documents-and-resources). Waxaa intaa dheer, in cid kasta oo codsata nidaamka u degsan Nidaamka Gargaarka Maaliyadeed, warbixinta Gargaarka Maaliyadeed, Codsiga Gargaarka Maaliyadeed, jadwalka Gargaarka Maaliyadeed iyada oo boostada loogu dirayo lacag la'aan. Telefoonada aad kala xiriiri kartaan si aad u heshaan qoraaladaas bogga internetka iyo halkanba waa lagu xusay. Qoraaladan waxa ay ku qoran yihiin afka Ingiriisiga iyo afka bulshada tiradoodu ka badan tahay 10% dadka degaanka ku nool.

2. Luqud fudud ayaa lagu qoray xeerarka u degsan gargaarka Maaliyadeed iyo codsiga iyo jaantuska waa mid laga heli karo isbitaalada.

3. Warbixinta kharashka bukaanka ee deynta lagu leeyahay waxaa ku jira wargelin muujineysa in bukaanku codsan karo gargaarka maaliyadeed, warbixinta kooban ee gargaarka maaliyadeed iyo nidaamka gargaarka maaliyadeed.

4. Telefoonada ay bukaanka u soo diraan xafiisyada iyo hay'adaha lacag ururinta waxaa lagu caddeynayaa macluumaad lagu wargelinayo in bukaanka aan awoodin bixinta lacagta ay codsan karaan gargaar maaliyadeed.

5. Goobaha is diiwaan gelinta ee isbitaalka sida gargaarka degdegga ah, ayaa lagu dhakinayaa calaamadda gargaarka maaliyadeed iyo telefoonada lagala xiriiri karo kaasoo aad ka heli kartaan macluumaad dheeraad ah.

6. Sidoo kale macluumaad ku saabsan nidaamka gargaarka maaliyadeed ah waxa aad ka heli kartaan hay'adaha degaanka ee u adeegga dadka dakhligoodu yar yahay.

7. Xubnaha bulshadu waxa warbixinta maaliyadda ay ka codsan karaan iyada oo lacag la'aan ah Carris Health ee tel;efoonka (320) 235-4543.

8. Carris Health waxa ay gacan saar la leedahay hay'adaha u adeega dadka dakhligoodu hooseeyo si ay u gaarsiiyaan nidaamka gargaarka maaliyadeed dadka ay u adeegaan.

Carris Health waxa ay leedahay nidaam kharash bixin iyo lacag soo ururin oo ay dadaweynuhu ka arki karaan bogga internetka ama ay ka codsan karaan Xafiiska Adeegga Bukaanka.

XIGASHADA SHARCIGA AH

Waa mid u gaar ah hay'ad kasta, halkan laguma xusin.

XIGASHADA TIXRAACA

Waa mid u gaar ah hay'ad kasta, halkan laguma xusin.

ISBARBARDHIGGA

Nidaamka Lacag Soo ururinta, Fulinta Nidaamka Lacag Soo Ururinta, Koox Sadexaad ee Deyn Soo Ururinta, Nidaamka Dhexdhexaadinta ee Lacag Soo Ururinta, Isbitaalada ee Bukaanka Aan Laheyn Ceymiska.

Caddeyn: Nidaamka, habka loo maro, waxaa lagu daabacay CentraNet oo loogu talo galay dadka isticmaala internetka. Waxaa suurogal ah in aan nuqul loo dirin shirkadaha ama hay'adaha heli kara qoraalkan, iyada aoo CenraCare Health aanay damaanad qaadeyn sida uu qoraalkan u khuseeyo hay'adaha dibadda.